

JAMHUURIYADDA SOMALILAND

Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka  
iyo Wacyigelinta



REPUBLIC OF SOMALILAND

Ministry of Information, Culture  
and National Guidance

## Xafiiska Wasiirka

Tixraac: WWW/XW/73/08/2019

Taariikh: 09. September 2019

### WAR SAXAAFADEED

**Hargeysa, Isniin, 09.09.2019**-Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta Jamhuuriyadda Somaliland Mudane Maxamed Muuse Diiriye wuxuu kulan la yeeshay telefishanadda madaxa bannaan ee dalka Somaliland laga leeyahay. Kulankaas oo ka dhacay Xafiiska Wasiirka, waxa lagu gorfeeyay sidii loo xoojin lahaa xidhiidhka wada-shaqayneed ee wasaaradda iyo telefishanadda gaarka loo leeyahay.

Dhanka Wasaaradda, kulanka waxa Wasiirka ku weheliyey Wasiir ku xigeenka, Mudane Cabdinaasir Cumar Jaamac, Agaasimaha Guud Mudane Mukhtaar Maxamed Cali iyo Agaasimaha Waaxda Qorshaynta Mudane Cabdiqaadir Dayib Askar, Dhinaca kale, telefishanadda madaxa bannaan ee dalka laga leeyahay ee kulanka ka soo qaybgalay waxa ka mid ahaa: Saab TV, Eryal.TV, Horn Cable TV, Star TV, Codka Bariga Africa (CBA), Badda Cas TV, Bulsho TV, SOMNews TV iyo Sahan TV.

Wasaaraddu waxa ay go'aamisay in telefishanadda madaxa bannaan wararka ay tebiyaan soo horraysiiyaan wararka ku saabsan Jamhuuriyadda Somaliland, maaddaama aynu kala nahay laba dal iyo laba dawladood, Sidoo kale wararka Soomaaliya ay ku daraan wararka dalka dibadiisa, waxaanu go'aankaani ku dhaqangalaya **muddo laba todobaad ah** oo ka bilaanmaysa maanta, **09.09.2019**.

Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta Jamhuuriyadda Somaliland oo ah ha'yadda Dawladda Dhexe u qaabilsan la xidhiidhka warbaahinta, isla markaana xeerinaysa maba'diida dastuuriga ah ee la xidhiidha tebinta wareed ee madaxa bannaan, waxa ay faraysaa in ay Warbaahintu guud ahaan dhawraan karaamada iyo qaranimadda Jamhuuriyadda Somaliland, una hoggaaansamaan Dastuurka, xeerarka dalka iyo Isfahanmaka Guud ee Wada Shaqaaynta Dawladda Iyo Warbaahinta.

#Dhammaad#



Cinwaan: Degmada 26ka Juun, Waddada Raadyow Hargeysa | Tel: Tel: 06-252-63-442-4017/065-777-7780 |

Web: [www.warfaafinta.sl.com](http://www.warfaafinta.sl.com)